

Qoraal Kooban

07|2017

Aragtida Shacabka ee Dastuurka Kumeelgaarka ah ee Soomaaliya

Qodobada ugu muhiimsan

- Inta badan 1422-da muwaadin oo aan xog uruurinta ka samaynay aragtii wanaagsan ayey ka qabeen dastuurka.
- In ka badan kala bar dadka aan waraysannay waxa ay rumeynsnaayeen in siyaasiyiintu aanay dhab ka ahayn dhowridda iyo ku dhaqanka dastuurka.
- Inta badan dadka aan xog uruurinta ka samaynay waxa ay sheegeen awoodaha iyo waajibaadka dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada oo aan kala caddeyn in ay asal u tahay khilaafyada u dhixeeya dowladda dhexe iyo maamullada gobollada.
- Dadka aan xog uruurinta ka sameynay waxa ay u arkeen dastuurka in uu xal u noqon karo dhibaatooyinka siyaasadeed ee Soomaaliya ka jira.
- Hay'ado kala duwan sida Guddiga Lasocodka baarlamaanka ee arrimaha dastuurka, Wasaaradda Arrimaha Dastuurka, iyo Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista Dastuurka ayaa leh waajibaadyo kala duwan ee hannaanka dib-u-eegista dastuurka. Aqalka sare iyo wasaaradaha dastuurka ee maamul goboleedyada ayaa sidoo kale doonaya in ay kaalin ka qaataan hannaanka dib-u-eegista dastuurka.
- Shacabbka iyo bulshada rayidka sanadihi lasoo dhaafay si ku filan loogalama tashan dib-u-eegista dastuurka welina lama siin door ay talooyin mug leh ku biirin karaan hannaanka dib-u-eegista dastuurka.

Hordhac

Inkasta oo sanado badan lagu bixiyay qorista iyo maalgelinta samaynta iyo dib-u-eegista dastuurka, Soomaaliya weli ma lahan dastuur dhamaystiran oo ay shacabku talo ku yeeshen. Golaha Metelaadda Qaran, oo laga soo xulay beelaha Soomaaliyeed bishii Juun 2012, ayaa ansixiyay dastuurka federaalka kumeelgaarka ah ee Soomaaliya bishii Juulaay 2012 iyaga oo aan dib-u-eegis ku sameynin qodobada dastuurka. Guddi madax bannaan iyo mid baarlamaan ayaa loo xilsaaray in ay dib-u-eegis ku sameeyaan, qabya tiraan, islamarkaana qaban-qaabiyaan afti dadweyne kahor inta aanay dhammaan muddaddii afarta sano ahayd ee ku ekeyd sanadkii 2016 oo ay heysteen baarlamaankii iyo dowladdii ugu horreysay oo aan kumeelgaar ahayn ee dalka ka dhalata burburkii kaddib.

Si haddii loo eego, hannaanka dib-u-eegista Dastuurka Kumeelgaarka ah waxa ku lug lahaa laamo badan oo dowladda katirsan, wasaarad u gaar ah, iyo guddi madax bannaan iyo mid baarlamaan. Istaraatijiyo isdiiddan iyo isfaham darro ka dhex jirta saddexda hay'adood ee arrimaha dastuurka [Wasaaradda Arrimaha Federaalka, Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka iyo Guddiga Lasocodka Baarlamaanka]

waxa ay gaabis ku keentay hannaanka dib-u-eegista dastuurka. Weli ma cadda in madaxda cusub ee maamulka Madaxweyne Farmaajo ay kuwii hore ka duwan yihiin. Balse waxyabihii keenay loollanka hay'adaha weli waa ay jiraan, sida: yaa ah hay'adda ama guddiga ugu muhiimsan hannaanka dib-u-eegista, yaase maamulaya dhaqaalaha ku baxaya howsha dib-u-eegista. Mid kasta oo kamid ah saddexda hay'adood (Wasaaradda Arrimaha Dastuurka, Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, iyo Guddiga Lasocodka Baarlamaanka) waxa ay isku aragtaa in ay iyadu tahay midda hoggaanka hannaanka dib-u-eegista iska leh, loollaanka maamulidda dhaqaaluhuna meesha kama marna. Saddexda hay'adood waxa ay mararka qaar u shaqeeyeen si isbarbar socod ah waxa ayna khilaafkooda muujiyeen iyaga oo isticmaalaya warbaahinta. Waxa ay soo saareen qabya-qoraallo is diiddan waxa ayna dhawaan bilaabeen in aragtio kala duwan usoo bandhigaan shacabka iyo sidoo kale beesha caalamka¹.

Guddiga baarlamaanka ee dastuurka iyo midka madaxa bannaan waxa ay si degdegsiimo leh, kala goonni goonina ah dib-u-eegis ugu sameeyeen dastuurka bilihii ugu danbeeyay ee baarlamaankii iyo dowladdii wakhtigeedu dhammaaday dabayaaqadii sanadkii 2016.

1) Wasaaradda Dastuurka waxa ay qortay qorshe loogu magic daray 'Master Plan' oo qeexaya hannaanka dib-u-eegista dastuurka. Madaxa guddiga ICRC waxa uu ku sheegay in uu qorshahaasi yahay mid aan dastuurka waafaqsaneyn islamarkaana meesha ka saaraya awoddii guddigaa madaxa bannaan ee dib-u-eegista dastuurka. Puntland ayaa sidoo kale diidday qorshaha wasaaradda dastuuka .

Guddiga lasocodka dastuurka ee baarlamaanka ayaa baarlamaankii sagaalaad u gudbiyay nuqul kamid ah dastuurka oo ay dib-u-eegis ku sameeyeen, kaas oo aanay guddiga madaxa bannaan iyo kan baarlamaanku heshiis ku wada ahayn. Maaddaama muddada baarlamaanku ay dhammaaneysay dabayaaqada sanadkii 2016, hannaanka qabya tirka dastuurka waxa loo hakiyay doorashadii baarlamaanka tobanaad. Baarlamaanka cusub, oo howshiisa bilaabay bishii Disembar 2016, waxa uu Guddiga Lasocodka baarlamaanka usoo xulay 10 xubnoood (shan aqalka sare ka tirsan iyo shan ka tirsan golaha shacabka). Ma ahayn mid habboon in dhammaan 10-ka xubnoood ee labada aqal lagasoo xulay ay dhammaantood ahaadaan rag, taas oo macnaheedu tahay in meesha laga saaray metelaaddii dumarka, oo ah qiyastii, kala bar tirada shacabka Soomaaliyeed.

Shacabka Soomaaliyeed weli aragti iyo fikir badan kuma aanay biirin dastuurka – dukumintiga sharci ahaan ugu muhiimsan dalka, oo saameynaya dhammaan qeybaha kala duwan ee noloshooda. Talooyin macno leh oo ka yimid shacabka waa ay ka maqnayd hannaanka dib-u-eegista dastuurka tan iyo markii uu bilowday. Sikastaba ha ahaatee, talooyinka iyo aqbalaadda shacabka waxa ay muhiim u tahay in dastuurka kumeelgaarnimada laga saaro maadaama ugu danbeyn lagu ansixin doono afti dadweyne.

Habka daraasadda loo sameeyay


Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasada waxa uu sameeyay aragti uruurin ku aaddan fikradda ay shacabku ka qabaan dastuurka kumeelgaarka ah iyada oo ay ujeedadu ahayd in la ogaado heerka fahan ee shacabka ee arrimaha dastuurka. Xog uruurinta waxa si isku mid ah looga sameeyay bishii Janaayo 2017 ilaa shan magaalo oo kala ah Boosaaso oo katirsan Puntland, Beledweyne oo katirsan Hirshabelle, Baydhabo oo katirsan Koonfur Galbeed, Kismaayo oo katirsan Jubaland, iyo caasimadda Soomaaliya ee Muqdisho. Dhalinyaro jaamacado dhameeyay oo ay tababareen islamarkaana kormeerayeen cilmibaarayaal katirsan Machadka Heritage ayaa soo uruuriyay xogta. Magaalooinkan waxa loo doortay si ay daraasadda uga muuqato aragtiyada kala duwan ee gobollada.

Dad gaaraya ilaa 1,422 muwaaddin oo ay da'doodu ka weyn tahay 18 sano ayaa laga waraystay shanta magaalo. Kala bar dadkaasi waxa lagu wareystay goobaha ay dadweynaha isugu yimaadaan, halka inta kalana loogu tagay guryahooda. In ka badan kala bar (59 boqolkiiba) waxa ay ahaayeen rag halka 41 boqolkiiba ay dumar ahaayeen.

Lixdan iyo lix boqolkiiba dadka xog uruurinta laga sameeyay waxa ay ka yaraayeen 35 sano; 22 boqolkiiba waxa ay da'doodu u dhexeysay 35 – 44 sano; 12 boqolkiibana waxa ay ka weynaayeen 45 sano. Ku dhawaad 27 boqolkiiba dadka xog uruurinta laga sameeyay waxa ay lahaayeen waxbarasho jaamacadeed; in ka badan 33 boqolkiiba waxa ay dhammeeyeen dugsi sare; 16 boqolkiiba dugsi hoose ilaa dhexe ayay gaareen; tiro wax yar ka badan 23 boqolkiiba iyagu waxbarasho nidaami ah sooma marin. Marka la eego dhanka shaqada, 31 boqolkiiba wax shaqo ah ma ay heyn; 20 boqolkiiba guri joog ayay ahaayeen; 18 boqolkiiba shaqo ay iyaga abuurteen ayey ka shaqeynayeen; 19 boqolkiiba waxa ay ka shaqeynayeen ganacsiyada gaarka loo leeyahay; siddeed boqolkiiba waxa ay ahaayeen shaqaale dowladeed; afar boqolkiibana waxa ay ahaayeen beeraleey.


Xog-ogaalnimada dastuurka

Tiro aad u badan (93 boqolkiiba) oo kamid ah dadka xog uruurinta laga sameeyay shanta magaalo waxa ay ka war qabeen in uu jiro dastuur federaal ah oo kumeelgaard ah. Kaliya toddobo boqolkiiba ayaan ka warqabin in uu jiro dastuurka federaalka. In dadka xog uruurinta laga sameeyay ay ku nool yihiin magaalooiyin waaweyn islamarkaana intooda badan lagu wareystay goobaha dadweynaha isugu yimaadaan ayaa suuragal ah in ay qeyb ka qaadataay xog ogaalnimada dadka aan wareysannay. Bulshada Soomaalida oo siyaasadda aad u daneeysa, sababo la xiriira amniga dalka oo liita iyo Soomaalida oo aad u istcmaasha internet-ka warbaahinta (sida raadiyaha iyo telefishinka) ayaa sidoo kale saameyn ku yeelan karta aqonta dadka aan wareysannay iyo xog ogaalnimadooda in uu dastuur federaal ah jiro. Sabab kastaba ha noqotee, waa ififaalo wanaagsan in tiro aad u badan oo Soomaali ah ay xog ogaal u yihiin dastuurka qaran. Sikastaba ha noqotee, Machadka Heritage ma hubo in dhammaan dadka la wareystay ay fahamsan yihiin in dastuurku uu weli kumeelgaard yahay ama in ay aad u og yihiin nuxurka qodobada dastuurka.



93 boqolkiiiba dadka ah ee sheegay in ay xog ogaalka u yihiiin dastuurka dalka, intooda badan (67 boqolkiiiba) waxa ay sheegeen in ay fikrad ka heystaan wawa ku qoran dastuurka. Ku dhawaad afar meelood meel (22 boqolkiiiba) waxa ay ku jawaabeen in ay fikir buuxa ka heystaan dastuurka. 11 boqolkiiiba ayaa sidoo kale ku jawaabay in aanay wax fikrad ah ka heysan wawa ku qoran dastuurka inkasta oo ay ogyihiin in uu jiro dastuur federaal ah.

Fikir intee la'egayaad ka haysataa qodobada dastuurka?




Xog uruurinta waxa ay muujineysaa in xog-ogaalnimada dastuurka ay xiriir la leedahay da'da, jinsiga, iyo heerka waxbarasho ee dadka la wareystay. Dadka da'doodu u dhixeyso 25 sano ilaa 34 sano (35 boqolkiiiba) ayaa ugu sarreeyay dadka fikradda buuxda ka heystaan dastuurka. Afar meelood meel (25 boqolkiiiba) dadka da'doodu u dhixeysay 18-25 sano iyo 35-44 sano ayaa sidoo kale fikrad buuxda ka heystay dastuurka. 15 boqolkiiiba oo kaliya dadka da'doodu ka weyn tahay 45 sano ayaa sheegay in ay firad buuxda ka heystaan dastuurka. Intaa waxa dheer, in ay jirto xiriir ka dhixeyya jinsiga iyo xog ogaalnimada. Raga (77 boqolkiiiba) ayaa aad uga xog ogaalsanaa dumarka oo ahaa 23 boqolkiiiba. Heerka waxbarasho waxa ay sidoo kale ahayd arrin saameyn ku leh jawaabta la wareystayaasha. Dadka jaamacadaha dhameeyay ayaa ugu xog ogaalsanaa oo gaarayay ilaa 44 boqolkiiiba, marka la barbar dhigo 35 boqolkiiiba oo dhameeyay dugsi sare; 13 boqolkiiiba oo dhameeyay dugsi hoose ilaa dhexe; iyo 8 boqolkiiiba oo aan iskuul nidaami ah dhiganin.

Aragtida laga qabo dastuurka

Dadka sheegay in ay fikir ama fikrad buuxda ka heystaan dastuurka, tiro aad u badan oo kamid ah (72 boqolkiiiba) waxa ay sheegeen in ay aragtii wanaagsan ka qabeen dastuurka, halka 28 boqolkiiiba ay dareen/aragtii tuhun wadata ay dastuurka ka qabeen

Waa maxay aragtidaada ku aaddan dastuurka?




Sida aan ku sheegnay warbixin uu Machadka Heritage daabacay sanadkan 2017, ka qeyb gelinta shacabka ee arrimaha dastuurka ee muhiimka ah waa ay yareyd muddooyinkii lasoo dhaafay, taas ayaana laga yaabaa in ay keentay dareenka dadka aan xog uruurinta ka sameynay. In ku dhawaad saddex meelood meel dadka noo jawaabay ay ku qiimeeyeen dastuurka federaalka in uu yahay mid hooseeya waxa ay hay'adaha ka shaqeeyaa dastuurka sida Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, Guddiga Lasocodka Baarlamaanka, iyo Wasaaradda Arrimaha Dastuurka u muujineysaa in loo baahan yahay in ay ballaariyaan la tashiga dadweynaha si loo xaqijiyo in muwaadiniintu ay talo macna leh ku yeeshaan hannaanka dastuur-sameynat.

Dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada

Mid kamid ah arrimaha sida aadka ah loogu kala aragtida duwan yahay ee dastuurka federaalka kumeelgaarka ah waa awoodaha iyo masuuliyadaha dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada. Tiro aad u badan oo kamid ah dadka xog uruurinta laga sameeyay (66 boqolkiiiba) waxa ay sheegeen in dastuurku uu asal u yahay khilaafka u dhixeyya dowladda dhexe ee federaalka iyo maamul goboleedyada.

Ma u maleyneysaa in uu dastuurku sabab u yahay is-faham la'aanta dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada?



Axdigii ugu horreyyay ee federaalaynayey Soomaaliya waxa la ansixiyay sanadkii 2004, laakiin federaalaynta dalka waxa ay bilaabatay sanadkii 2013. Somaliland waxa ay sheegtay in ay ka go'day Soomaaliya bishii May sanadkii 1991, mustaqbalka Somaliland ee Soomaaliyana weli ma cadda. Puntland, oo iyadu la aasaasay 18 sano kahor, waxa ay sidoo kale ka horreysaa axdigii federaalka kumeelgaarka ahaa.

Afar maamul goboleed ayaa la sameeyay afartii sano ee lasoo dhaafay oo kala ah Jubaland, Koonfur Galbeed, Galmudug iyo Hirshabelle.


Maqaamka caasimadda Muqdisho weli lama dhameys tirin. Weli kuma cadda dastuurka awoodaha u gaarka ah dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada. Loollan awoodeed ee u dhixeyya dowladda federaalka iyo maamullada waxa uu ahaa mid muuqda tan iyo markii ay Soomaaliya nidaamka federaalka qaadatay.

Murannada soo laalaabtay ee u dhexeeyaa dowladda dhexe iyo gobollada ee ku aaddan isticmaalka awoodaha ayaa suuragal ah in ay saameysay in 66 boqolkiiba dadka aan wareysannay ay rumeynsnaayeen in dastuurka uu yahay meesha uu ka imaanayo khilaafka iyo loollanka.

In la kala caddeeyo awoodaha dowladda federaalka iyo kuwa maamul goboleedyada, islamarkaana laga heshiiyo arrimaha muranka ka jiro sida wadaagga arrimaha maaliyadda iyo qeybsiga kheyraadka dabiiciga ah, qaab dhismeedka garsoorka iyo kuwo kale waa arrimo muhiim u ah hannaanka dib-u-eegista dastuurka kuwaasi oo go'aamin doono xiriirka u dhexeeyaa dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada. Machadka Heritage waxa uu arrimahan ku sharraxay warbixin dheer ee uu ku taliyay in la qaato soo jeedinta Guddiga Lasocodka baarlamaanka ee ah in 24 awoodood ay lahaato dowladda dhexe iyo 7 awoodood oo ay lahaanayaan maamul goboleedyada islamarkaana awoodo wadaag ah la sameeyo.

Fulinta qdobada dastuurka

Dadka aan wareysannay waxa la weydiiyay aragtidooda ku aaddan in dastuurka ay dhaqan geliyeen dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada. In ka badan kala bar (53.3 boqolkiiba) ayaa sheegay in ay aaminsan yihiin in qdobada dastuurka aanan la dhaqan gelinin, halka 35.3 boqolkiiba ay ku jawaabeen in dastuurka ay ku dhaqmeen masuuliyiinta dalka. 11.4 boqolkiiba wax fikrad ah kama aanay heysan.



Dastuurka federaalka, inkasta oo uu weli yahay kumeelgaarda, waa sharciga ugu sarreeya dalka. Waxa uu hagaa shaqada hay'adaha federaalka, waxa uuna qeexaa mudda xileedka madaxweynaha iyo baarlamaanka, iyo sidoo kale awoodaha saddexda laamood ee dowladda. Dhammaadkii sanadkii 2016, Madasha Hogganka Qaran, oo ah madal ay xubno ka ahaayeen madaxda dowladda federaalka iyo maamul goboleedyada, waxa ay muddo kordhin u sameysay madaxweynaha iyo baarlamaanka. Arrinkan iyo go'aanno siyaasadeed oo lamid ah ayaa loo arki karaa in ay yihiin sababta ay 53 boqolkiiba dadka aan xog uruurinta ka sameynay u rumeynsnaayeen in siyaasiyiinta aanay ilaaliniin sharciga u yalla dalka.


Awoodaha uu dastuurku siinayo madaxweynaha iyo golaha wasiirada, ayaa iyaduna dhalisa muranno siyaasadeed, jah-wareer iyo loollan.

Tani waxa ay sanado badan abuurtay khilaaf u dhexeeyalabada masuul ee dalka ugu sarreeya – Madaxweynaha iyo Madaxa Galaha Wasiirada oo ah Ra'iisul Wasaaraha, kuwaas oo ku aaddan awoodaha dastuuriga ah oo uu mid weliba leeyahay. Taasina waxa ay cuuryaamisay habsami u socodka shaqada hay'adaha dowladda iyo dadaallada nabadda iyo dowlad-dhisidda dalka. Tan iyo sanadkii 2000 – oo dowladdii ugu horreysay oo kumeelgaard ah lagu dhisay Jabuuti khilaaf ka dhix dhashay madaxweynaha iyo raysal wasaarahaa waxaa ka dhashay, afartii madaxweyne ee dalka soo martay muddaddaas, in mid kasta uu magacaabay saddex ra'iisul wasaare. Dhaqankan siyaasadeed waxa uu curyaamiyay shaqadii hay'adaha dowladda. Arrinkan iyo kuwo lamid ah ayaa suuragal ah in ay sidoo kale saameyn ku yeeshen aragtida shacabku ka qabaan hirgelinta dastuurka.

Dastuurka iyo xaaladda siyaasadda

Dadka xog uruurinta laga sameeyay waxa la weydiiyey haddii ay u maleynayaan in uu dastuurku xal u noqon karo xaaladda siyaasadeed ee Soomaaliya. Tiro aad u badan (73 boqolkiiba) ayaa sheegtay in ay rumeysan yihiin in uu dastuurku yahay hannaan lagu dhisi karo hay'ado dowladeed oo si wanaagsan u shaqeeya. Kaliya 18 boqolkiiba ayaa ku jawaabtay in aanay rumeynsney dastuurka in uu xal u noqon karo xaaladda siyaasadda Soomaaliya, halka boqolkiiba sagaal aanay wax fikrad ah ka heysanin.

Ma u maleyneysaa in dastuurku uu xal u yahay
xaaladda siyaasadda ee Soomaaliya?



Xaqiqadu waxa ay tahay, arrimaha muranku ka jiro iyo qdobada la xiriira ee dastuurka ku jira waxa ay muhiim u yihiin hannaanka dib-u-eegista dastuurka, waxa ayna u baahan yihiin wada hadal iyo heshiis wadar-oggol ah in ay ka gaaraan bulshada, ee anay dhowr siyaasi si gooni ah isaga afgaran.

Is afgarad laga gaaro arrimaha siyaasadda sida nooca dowladeed oo ay Soomaaliya qaadaneyso (mid madaxweyne mise mid baarlamaani ah), awoodaha madaxweynaha iyo kuwa ra'iisul wasaarahaa, waajibaadka iyo awoodaha dowladda dhexe iyo kuwa maamul goboleedyada, qeybsiga maamulka dhaqaalaha iyo khayraadka dabiiciga ah qaab dhismeedka hay'adaha garsoorka iyo maqaamka Muqdisho waa arrimaha muhiimka ah ee u baahan in aragtibulsheed mideysan laga qaato iyo heshiis muwaadiniin oo wadar-oggol ah. Arrimahan in lagu heshiyo si cadna loogu qoro dastuurka waxa ay xal waara u noqon.

Gunaanad

Afartii sano ee lasoo dhaafay, aragtida shacabka si gaabis ah ayay uga muuqatay hannaanka dib-u-eegista dastuurka. Aragtii uruurintan waxa ay muujineysaa in dadka laga wareystay shan magaalo oo waaweyn ay aragtiyo kala duwan oo u badan kuwo wanaagsan ka qabaan dastuurka inkasta oo aanan si ku filan loola tashanin. Inta badan dadkii aan wareysannay waxa ay rumeynsaayeen in mugdiga ku jiro dastuurka ay ka dhalatay hardan awoodeed iyo khilaafyo siyaasadeed ee u dhixeyya dowladda dhexe iyo maamullada gobollada.

Sidaas si lamid ah, muwaadiniinta la wareystay waxa ay tilmaameen in siyaasiyiintu aanay si dhab ah ugu dhaqmin dastuurka. Sikastaba ha noqotee, shacabka la waraystay waxa caddeeyeen in ay rurumeysan yihiin in dastuurku uu xal u noqon karo xaaladda siyaasadeed ee Soomaaliya. Maaddaama hoggaan cusub uu qabtay dowladda federaalka, in ahmiyad mug iyo macno leh la siiyo in dib-u-eegis sax lagu sameeynayo dastuurka iyo in loo oggolaado shacabka iyo bulshada rayidka in ay ka qeyb galaan dib-u-eegista dastuurka, waxa ay tallaabo muhiim ah u noqon kartaa in la helo dastuur nidaamiya danaha dhaqan-dhaqaale iyo siyaasadeed ee shacabka Soomaaliyeed iyo hay'adaha dowladda.

Talooyin tixgelin mudan

- Si dastuurka dib-u-eegis dhammeystiran loogu sameeyo, saddexda hay'adood ee dowladda – Wasaaradda Arrimaha Dastuurka, Guddiga Lasocodka baarlamaanka iyo Guddiga Madaxa Bannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka – waa in ay isla shaqeeyaan. Tani ayaa ah habka kaliya ee lagu soo saari karo nuqul dastuur oo afti dadweyne ama qaab kale lagu ansixin karo. Loollan joogto ah ee u dhixeyya laamahan waxa uu si weyn u dhaawici doonaan hannaanka dib-u-eegista, haddaysanba la degin.

Waxaa sidaas si lamid ah muhiim ah in hannaanka laga qeyb geliyo wasaaradaha dastuurka maamul goboleedyada oo iyagu kaalin muhiim ah ku leh in la is waafajiyoo dastuurka federaalka iyo kuwa maamul goboleedyada.

- Hay'adaha dowladda ee masuulka ka ah dib-u-eegista dastuurka waa in ay si weyn hannaanka dib-u-eegista uga qeyb geliyaan shacabka oo intiisa badani ay aragtii wanaagsan ka qabaan dastuurka, inkasta oo ilaa hadda aanan siday mudnaayeen looga qeyb gelin. Cilmi-baarisyo ayaa muujiyay dastuuryada ku kooban inta awoodda iyo codka leh (elite) inta badan in ay guuldareystaan.

- Maaddaama cutubyo kooban ay si gaar ah u khuseeyaan arrimaha lagu kala aragtida duwan yahay, sida qeybsiga awoodaha iyo kheyraadka, amniga iyo garsoorka, qaab dhismeedka dowladda, iyo maqaamka Muqdisho – saddexda hay'adood ee dib-u-eegista dstuurka masuulka ka ah, waa in ay dhaqaale iyo wakhtiba geliyaan xal u helidda iyo aragtii midaysan ka soo saaridda qodabadaas.

- Kaddib sanooyin la dayacay sarraynta dastuurka, siyaasiyiinta sarsare waa in ay tusale fiican u noqdaan ku dhaqanka iyo sarreyntha sharciga, waana in ay abuuraan jawi abuuraya in lasoo saaro dastuur dhiirrigelinaya sarreyntha sharciga.

- Maaddaama uu dastuurku yahay heshiis bulsho, hay'adaha ka shaqaynaya dib-u-eegista dastuurka waa in ay dib-u-heshiisiinta iyo is-dhexgalqa bulshada ka dhigtaan mabaadii'da hageysa hannaanka dib-u-eegista.

- Bulshada rayidka waa in aylaba jibbaaraan dadaalkooda ku aaddan ka qayb-qaadashada hannaanka dib-u-eegista dastuurka maadaama uu dastuurku yahay mid saameyn ku yeelanaya muwaadin kasta iyo jiilalka soo socda. Haddii baraarug laga kororsanayo, la dhuumashadii dastuur-samaynta, ee ay siyaasiyiintu isku koobeen, bulshada rayidka waa in ay fahmaan in kaalinta kaliya oo ay ku yeelan karaan samaynta dastuur qaran in ay tahay kaalinta ay iyagu iskood isugu xil-qaamaan.



Akhristayaasha waxaa la ogeysiinaya inay daabici karaan qoraalkan, haddii aaney ka ganacsaneyn. Maadaama uu Machadka Heritage leeyahay xuquuqda qoraalka, waxaa laga codsanaya ciddii dibu u daabacdha inay xusto Heritage, isla markaana Machadka lala soo socdsiiso.

© Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda. Qoraalkan waxaa lagu daabacay hannaanka Creative Commons Attribution, qaybtiiisa aan macaash-doonka aheyn (CC BY-NC 3.0)